



waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.



Maxaa Loo Bacriminaya Qashinka Xoolaha?

Faraska ayaa soo saari kara celcelis dhan 50 bawn oo qashin ah maalintii—taasoo ah 2 tan sanadkii! Si lamid ah maamulka bulaacada aagaga magaalada uu muhiim ugu yahay caafimaadka dadka, maaraynta qashinka xoolaha ayaa muhiim u ah caafimaadka faraska.

Labo farsamo oo guud oo lagu xaliyo qashinka xoolaha waxaa kamid ah in si toos ah loogu shubo dhulka taaga ah ama in la aruuriyo. Hase yeeshay, ayadoo la adeegsanaayo waqtii iyo awood aan badnayn, qashinka xoolaha ayaa laga dhigi karaa maadooyin muhiim ah oo kobcinaaya beeraha ama dhulka taagaga ah.

Faa'iidooyinka Bacriminta Qashinka Faraska

- Baabi'inta meelaha ay ku xoomi karaan cayayaanku.
- Dilista camarka khatarta badan (ayna ku jiraan ugxmaxaha jeermiska), bakteeriyyada, iyo miraha waxyabaha haleeya beeraha.
- Hoos u dhigida xajmiga agabka loo baahan yahay nus kamid ah.
- Baabi'inta urka qarmuun.
- Inay tahay shaqo raqiis ah oo fudud in la sameeyo.
- Abuurista wax soo saar kama danbaysa oo nafo badan siinaaya ciida iyo dhoobada loo adeegsan karo beeraha, daaqa, iyo dhulka taaga ah.
- Hoos u dhigista suurtgalnimada in biyaha daadka sumaysa ka baxaan goobta fardaha.

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijarorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismamaulka San Diego ayaan la daawayn kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

Naga caawi difaaca marinadeena biyaha adoo bacriminaaya qashinka fardaha. Tilmaamaha ku qoran dhabarka danbe ayaa kaa caawinaysa inta aad hawsha wado.

tilmaamo dheeraad ah >>>

waad ku mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.

Barnaamija Difaaca Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego **1-888-846-0800**
watersheds@sdcounty.ca.gov | www.sandiegocounty.gov/stormwater



waad ku mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka qaadatay
difaacida kanaaladeena biyaha.



Tilmaamo ku aadan Bacrinimta Saxda ah

Qasacyada

- Hal qasac oo dhan 5' x 5' x 5' halkii faras ba.
- Haddii uu qashinku buuxiyo wax ka badan lix qasac, waxaad isku dayi kartaa inaad waynayso nidaamka bacriminta.

Daboolista

- Dabool qasacaaga si uusan u qalalin, iyo si aad uga hortagto in biyaha daadku sumoobaan marka roobku da'aayo.

Sanduuqyada waawayn

- Xajmiga qasaca oo dhan ugu yaraan 4' x 4' x 4' ayaa ugu haboon si loo gaaro heerkullada bacriminta ee fiican.
- Balaca salka hoose ee qasaca waa inay ka wayn tahay labo jibaad jooga.

Barta

- Dhig qasaca meel ugu yaraan 150 fiid kafog marinnada biyaha, balida, iyo ceelasha.
- Abuur oo hayso aagaga difaaca.
- Saar qasaca ciid adag, dusha qasacyada waa wayn, ama meel shub ama laami ah.

Rogista

- Si aad iskaga ilaalso dhibaatooyinka cudurka aadna kor u qaado heerkulka, qasacyada qashinka waa in la rogaa halmar asbuuc kasta.

Waraabinta

- Bacrimintu waa inay tahay mid u qoyan isla sida isbuunyo biyo la gashay.
- Waa inuusan daad ka bixin meesha.

! Xeerarka Ismaamulka ee Difaacaaya Caafimaadkaaga, Biyaha, iyo Dhulka

- Xeerka **Difaaca Waraha Biyaha ee Ismaamulka** ayaa qasab ka dhigaaya in qashinka xoolaha la aruuriyo ugu yaraan labo jeer asbuucii kadibna lagu bacrimiyo ama loo xareyeo qaab kahortagaaya inaysan biyaha raacin.
- Bacriminta qashinka faraska ayaa la ogol yahay Ismamaulka San Diego oo ah fursad la siiyay mulkiileyaasha fardaha ee deegaanka.
- Mulkiileyaasha guryaha ayaa u adeegsan kara bacriminta la abuuray goobta ama siin kare cid kale, laakiin ma iibin karaan.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka, la xariir Waaxda Adeegyada Qorshaynta iyo Hormarinta ee Ismaamulka oo aad ka helayso (858) 694-2960.

Ilaha

Dib U Warshadaynta Ismaamulka San Diego

www.wastefreesd.org | 1-877-R-1-EARTH (1-877-713-2784)

Xarunta Solana ee Hormarinta Bii'ada

www.solanacenter.org | (760) 436-4986 x700

Barnaamijka Difaaca Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego 1-888-846-0800
watersheds@sdcounty.ca.gov / www.sandiegocounty.gov/stormwater